City of Burlington Vermont

**MAGAALADA BURLINGTON**
**WAAXDA SHAQOOYINKA DADWEYNAHA**
**QAYBTA KHAYRAADKA BIYAHA**
235 Penny Lane | P O Box 878 | Burlington, VT 05402
**P** 802.863.4501 | **F** 802.864.8233
water-resources@burlingtonvt.gov | www.burlingtonvt.gov/water

# Mashruuca Liiska-hubinta Beebabka Adeegga Biyaha

## SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO

### *Waa Maxay Mashruuca Liiska-hubinta Beebabka Adeegga Biyuhu?*

Magaalada Burlington waxa ay kala shaqaynaysaa Gobolka Vermont iyo Hay'adda Ilaalinta Deegaanka Maraykanka baahida heer qaran ah oo ah in la aqoonsado isla markaana laga saaro ilaha suuragalka ah ee liidhka biyaha cabitaanka ee dadweynaha. Iyada oo qayb ka ah baahidan, Khayraadka Biyaha Burlington waxa looga baahan yahay inay xaqiijiso ama aqoonsato waxyaabaha ay ka samaysan yihiin dhammaan beebabka adeegga biyaha ee Magaalada. Magaalada diiwaanka ugu ma jiraan wax beebab adeeg oo liidh leh oo shaqeeya mana filayso inay hesho wax beebab ah oo liidh leh; si kasta ha noqotee liiskan-hubintu waxa uu inoo yahay fursad weyn oo ay ku aqoonsanayno beebabka adeegga iyo qaybaha u baahan kara beddelka si loo joogteeyo tayo biyo iyo cadaadis biyo oo sarreeya, sida beebabka adeegga ee ku dahaadhan birta sinki, saacadaha cabbira biyaha, ama xidhiidhiyeyaasha kale.

### *Ma ku jiraa liidh biyahayga cabbitaanka?*

Waa arrin aad suuragalnimada uga fog in liidh ku jiro biyahaaga cabbitaanka ee Burlington. Liidhku waxa uu geli karaa biyaha cabbitaanka marka waxyaabaha ay ka sameysan yihiin beebabka biyaha ee ka kooban liidhku ay duugoobaan. Duugowgu waa milanka ama xoqmitaanka birta ee uu sababo falgalka kiimikaad ee u dhexeeya biyaha beebabkaaga biyaha. Si looga hortago duugawga, Khayraadka Biyaha Burlington waxa ay ku dartaa kiimiko loo yaqaan Zinc Orthophosphate biyaha kahor inta aanay ka iman xarunta daaweynta. Zinc Orthophosphate waxa ay dahaadhaa gudaha beebabka iyo qasabadaha biyaha, taas oo ka hortagta duugawga isla markaana yareynaysa suuragalnimada in liidhku uu ku jiro biyaha.

Magaalada Burlington diiwaanka ugu ma jiraan wax beebab adeeg biyo oo liidh leh oo shaqaynaya ah oo Magaalada ah mana filayso inay hesho wax beebab adeeg oo liidh leh, maadaama oo aan si caam ah aan marnaba loogu adeegsan Burlington. Qaar ah guryaha qadiimka ah ee leh beebabka birta ah ee ku dahaadhan sinki ayaa weli ku yeelan kara u baylahitaan liidh oo xaddidan nidaamkooda taas oo ka timaadda xidhiidhiyeyaasha gaagaaban ee u dhexeeya beebka adeegga iyo beebabka waaweyn ee loo yaqaan goosenecks, balse looma tixgeliyo qaybo liidh leh oo saameyn leh sida ay dhigayaan Muraajacooyinka Liidh iyo Kobar ee EPA. Taas marka laga yimaaddo, xaddiyo yaryar oo liidh ah ayaa ku jiri kara agabka adeegga biyaha ee gudaha (sida, beebabka, laxaamadaha, tuumbooyinka, qasabadaha, iwm.) guryaha qadiimka ah, ama saacadaha cabbira biyaha ee la rakibay wixii ka horreeyey 2001, balse sidoo kale ma saameyn doonto heerarka liidhka ee biyaha taas oo ay sabab u tahay xaddidaadaha daaweyneed ee wax ku oolka ah (sida, adeegsiga yareeyeyaasha duugowga).

### *Sababma ayey ka qaybqaadashadaydu muhiim u tahay?*

Mashruucani waxa uu xaqiijin doonaa inaynu u hoggaansanahay amarka EPA ee cusub ee lagu aqoonsanayo wixii beebab adeeg ee liidh leh laguna aqoonsanayo beebabka adeegga ee ku dahaadhan sinki ee ay dhici karto inay liigaan, jaraan ama yareeyaan cadaadiska biyaha muddo kadib taas oo ay keentay  waxyaabo ku dhex ururay beebka dhexdiisa.

Waxa jira wax ka badan 11,000 oo beeb adeeg biyo ah oo ka kooban waxyaabo u baahan in lagu aqoonsado ama lagu xaqiijiyo muddo ka yar hal sano. Baaxadda iyo wakhtiga baahidan awgeed, waxa aanu uga baahanahay macaamiisha Khayraadka Biyaha Burlington inay ka qaybqaataan si ay nooga caawiyaan yareynta kharashaadka hawlgalkayaga. Yareynta kharashaadka hawlgalku waxa ay naga caawisaa inaanu ku bixino biyaha qiimeyaal jaban, oo aan qaali ahayn isla markaana aanu siino macaamiishayada barnaamijyo lacag celin iyo qiime dhimis oo dheeraad ah.

### *Sidee baad u ururinaysaan macluumaadkan?*

Marka laga yimaaddo qabashada falanqayn dhamaystiran oo lagu sameeyo diiwaanada rakibaadda hore iyo kuwa hadda, waxa aanu si weyn ugu tiirsanahay dadweynaha inay ka qaybqaataan sahankayaga. Waxa aanu sidoo kale booqashooyin guriyeed ku tegi doonaa guryaha u baahan la socoshada waxaana aanu dhammaan mari doonaa xaafadaha qadiimka ah (sekedaha la sameeyey wixii ka horeeyey 1938 kii). Iyada oo la eegayo baaxadda mashruucan, waxa aanu si weyn kuugu dhiirrigelinaynaa inaad tallaabo qaaddo adiga oo ka jawaabaya sahankan, iyo sidoo kale wixii su'aalo la socod ee mustaqbalka ah ee aanu qabi karno ee la xidhiidha gurigaaga.

### *Maxaa ku dhici doona macluumaadkan?*

Khayraadka Biyaha Burlington waxa ay baahin doontaa khariidad si caam ah loo heli karo oo ay ku qoran yihiin natiijooyinka aanu helnay taas oo dadka degaanka ahi ay ka eegi karaan macluumaadka nidaamkooda mustaqbalka. Haddii aanu helno beebab u baahan beddelitaan, Khayraadka Biyaha Burlington waxa ay bilaabi doontaa Marxaladda II ee mashruucan si ay ugala hawlgalaan mulkiilayaasha guriga beddelitaanka beebabkooda adeega biyaha.

### *Miyaad qodaysaan aagga uu ku yaallo doogaygu?*

Maya, marxaladdan kamid ah mashruucu uma baahna qoditaan lagu sameeyo guryaha. Waa lagu ogaysiin doonaa haddii beebka adeeggaaga la calaamadiyo si loogu sameeyo baadhis dheeraad ah inta lagu gudo jiro Marxaladda II ee kamid ah mashruucan.

### *Tan wax lacag ah ma la igaga qaadi doonaa?*

Aqoonsiga waxyaabaha uu ka sameysan yahay beebka adeeggaagu waa bilaash, xattaa haddii aad leedahay xaalad gaar ah oo u baahan inay booqasho guriga ku yimaaddaan Khayraadka Biyaha Burlington. Haddii beebka adeeggaagu uu yahay liidh (uma badna'e), iyada oo aan wax kharash ah lagaa qaadeyn ayaa lagaa beddeli doonaa.

### *Waa maxay Xeerka Liidh iyo Kober ee EPA?*

Xeerka Liidh iyo Kober ee EPA waa sharci la dejiyey 1991 kii kaas oo xaddidaya heerarka ugu badan ee koberka iyo liidhka ee ku jiri kara nidaamyada qaybinta biyaha isla markaana ka shaqaynaya in uu ka saaro liidhka biyaheena cabbitaanka. Xeerka waa la cusbooneysiiyey iyada oo la waafajinayo aqoonta sayniska ee ugu dambeysa. Cusbooneysiinta u dambeysa, oo loo yaqaan Muraajacooyinka Xeerka Liidhka iyo Koberka, waxa uu waajibinayaa adeegyada biyuhu inay diiwaangeliyaan waxyaabaha ay ka sameysan yihiin dhammaan beebabka adeegga biyaha ee aagga ay ka hawlgalaan ee dhanka macmiilka iyo dhanka xarunta adeegga labadaba ugu dambeyn Oktoobar 2024. Haddii wax beebab ku dahaadhan sinki oo u baahan beddel ama beebab adeeg oo liidh ah la aqoonsado, xarunta adeegga waxa ku waajib ah inay kala shaqayso macaamiisha beddelitaanka iyada oo aan wax lacag ah ka qaadeyn macmiilka.

### *Waa maxay beebabka adeegga biyuhu?*


Beebabka adeegga biyuhu waa beebabka ka qaada biyaha biyo-qaybinta Magaalada Burlington isla markaana ugu gudbiya guri walba gaarkiisa. Guryaha badankoodu waxa ay leeyihiin keliya hal beeb adeeg, balse kuwo kale ayaa yeelan doona beeb adeeg biyood oo u gaar ah demінta dabka, waraabka, iyo adeegsiyada aan cabbitaanka loogu talagelin. Nooca waxyaabaha ay ka sameysan yihiin dhammaan beebabka adeegga waa in la diiwaangeliyaa iyada oo qayb ka ah mashruucan.

### *Maxay ka dhigan tahay Beddelka U Baahan Dahaadh Sinki (Galvanized Requiring Replacement, GRR)?*

Beddelka U Baahan Dahaadh Sinki waxa uu muujinayaa beeb adeeg bir ah oo dahaadh sinki leh oo hadda ama hore biyaha uga soo qaadayey "qulqulka foorarka" beeb adeeg oo liidh ah, ama hadda biyaha kasoo qaada beeb xaaladdiisa liidhka aan la ogeyn.

### *Sidee baan ku heli karaa beebka adeeggayga biyaha?*

Adeegga biyuhu waxa uu kasoo galaa guriga seeska ama gidaarka dabaqa hoose (caadi ahaan ka xiga waddada) waxana uu ku xidhmaa saacadda biyaha cabbirta. Gurigaagu haddaanu lahayn dabaq hoose markaa waxa aad ka eegtaa aag kale oo ilaashan sida kabadhka qalabka adeegyada guri ama geerashka. Sawirkan ayaa ku tusinaya halka beebabka adeegga biyaha caadi ahaan ay kaga yaallaan dhismaha.




### *Waa maxay waxyaabaha beebka adeeggaygu uu ka sameysnaan karaa?*

Beebabka adeegga biyaha ee uu yahay 2-hiish dhexroorkoodu ama uu ka yar yahay waxa ay ka sameysnaan karaan balaastig, kober, bir ku dahaadhan sinki, iyo liidh. Beebabka adeegga biyaha ee 2-hiish uu dhexroorkoodu ka weyn yahay waxa ay ka sameysnaan karaan xadiidka la maroorin karo (ductile) xadiidka aan la maroorin karin (cast), iyo balaastig. Fadlan dib u eeg hagahayaga kaas oo sharxaya sida loo aqoonsado waxa uu ka sameysan yahay beebka adeeggaaga biyuhu.

### *Ka waran haddii aan leeyahay beebab adeeg oo badan?*

Haddii gurigaagu leeyahay beebab adeeg oo badan (sida, ka guriga, ka dabdemiska iyo/ama ka waraabka), fadlan mid walba usoo qor garee si gaar ah. Foomka sahanka ayaa kuu kala dhigdhigi doona hannaankaas.

### *Ma gaadhi karayo beebka biyaha, maxaan sameeyaa?*

Haddii aad ku nooshahay dhisme guryo badan ka kooban, waxa aanu kala shaqayn doonaa mulkiilaha/maareeyaha guriga aqoonsiga beebka adeegga ee soo galaya.

### *Awood uma lihi inaan gaadho dabaqayga hoose oo aan aqoonsado waxa uu ka sameysan yahay beebka adeeggaygu.*


Khayraadka Biyaha Burlington waxa ay yeelan doontaa tiro xaddidan oo ballamo booqashooyin guri ah si ay u aqoonsato waxa uu ka sameysan yahay beebka adeeggaagu. Haddii aad saadaalinayso inaad u baahan doonto booqasho guri markaas fadlan waxa aad nagala soo xidhiidhaa lambarka (802) 863-4501 ama waxa aad noo soo dirtaa iimeyl si laguugu daro liiska sugitaanka. Waxa lagu la soo xidhiidhi doonaa Gu'ga 2024 ka si laguu siiyo faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida loo muddeysto wakhtiga aad doorbidayso.

### *Maxaa dhacaya haddii beebka adeeggayga biyuhu uu u baahan yahay in la beddelo?*

Waa lagu ogaysiin doonaa haddii aanu aqoonsano in beebka adeeggaagu uu yahay GRR ama liidh (uma badna'e) oo uu u baahan yahay beddel inta lagu gudo jiro Marxaladda II ee kamid ah mashruucan. Haddii beebka adeeggaagu uu u baahan yahay in la beddelo, iyada oo aan wax kharash ah lagaa qaadeyn ayaa la beddeli doonaa.

### *Wixii dayactiro ama beddelitaano beeb adeeg ah ee kale, waa maxay masuuliyadda iga saaran ka mulkiile guri ahaan?*

Wixii dayactiro ama bedelitaan beeb adeeg ah ee caadi ah, Magaalada Burlington iyo mulkiilaha gurigu waxa ay masuuliyadda iyo kharashka u qaybsanayaan boqolkiiba 50 laga soo bilaabo illaa kaagga biyuhu guriga ka soo galaan. Mulkiilaha gurigu waxa uu sidoo kale masuul ka yahay boqolkiiba 100 kharashaadka beebka adeegga laga soo bilaabo kaagga biyuhu guriga ka soo galaan illaa guriga oo ay kamid tahay saacadda cabbirta biyaha. Dhammaan shaqada beebka adeegga biyaha waa inay qabataa Khayraadka Biyaha Burlington iyada oo si kale ay u ogolaato waaxdu moojee. Sawirka hoose ayaa soo koobaya masuuliyadda mulkiilaha guriga iyo Magaalada Burlington ee qayb kasta oo kamid ah beebka adeegga biyaha.




### *Sidee baa ay Magaalada Burlington u qaaddaa tallaabo ay kaga hortagayso u baylihitaanka liidhka ee biyaheena cabbitaanka?*

Inkasta oo Magaalada Burlington aanay wax diiwaano ah ka hayn beebab adeegga biyaha ah oo liidh ah oo Magaalada ah isla markaana aanay fileyn inay hesho wax beebab adeeg oo liidh ah, waxa aanu kaga hortagaynaa u baylihitaanka liidhka anaga oo:

- Ku dareysa biyaha duugow yareeye loo yaqaan Zinc Orthophosphate. Tani waxa ay ka hortagtaa biraha, sida liidh iyo kober, inay soo gaadhaan biyaha.
- Qabanayna barnaamij muunad qaadis oo xooggan si aanu ula socono heerarka liidhka iyo koberka ee guryaha la dego ee ay u badan tahay inay u baylahsan yihiin liidhka anaga oo ku salaynayna taariikhda dhismahooda.

Taas marka laga yimaaddo, Gobolka Vermont waxa uu mamnuucay laxaamadda liidhka ee ka kooban wax ka badan 8% liidh 1988 kii. 2010 kii, Gobolku waxa uu hoos u dhigay xaddiga ugu badan ee ka koobnaanshaha liidhka ee la ogolaan karo si loogu tixgeliyo in "bilaa liidh" uu yahay celcelis ahaan in uu miisaankiisu noqdo 0.25% qasabadaha biyaha 0.20% na uu noqdo laxaamadda ama dareeraha loo adeegsado alxanka. Gobolka Vermont sidoo kale waxa uu leeyahay mid kamid ah barnaamijyada la socodka liidhka ee ugu adag wadanka oo loogu talagalay dugsiyada iyo goobaha lagu daryeelo carruurta maalintii.

### *Sidee baan u ogaan karaa inay ka jiraan ilo kale oo liidh ah gurigayga?*

Barnaamijka Liidhka Burlington waa barnaamij guriyeyn oo ka dhex jira Xafiiska Horumarinta Bulshada & Dhaqaalaha ee Magaalada Burlington (CEDO). Waxa ay siin karaan waxbarasho, booqashooyin guriyeed iyo sidoo kale wacyigelin iyo khayraad guryaha ku yaalla Burlington si looga hortago u baylihitaanka liidhka ee rinjiga liidhka leh waxana ay kugu xidhi karaan khayraad kale, sida barnaamijka Guryaha Caafimaadka Qaba, kaas oo ku siin kara kaalmo dhaqaale oo wax lagaga qabanayo walaacyada caafimaadka iyo ammaanka deegaan ee kale.

Waaxda Caafimaadka ee Vermont waxa ay bixin kartaa macluumaad ku saabsan dhibaatooyinka liidhka ee dheeraadka ah oo ay kamid yihiin kuwa laga helo ciidda, hiwaayadaha & xirfadaha gacanta, agabyada ay adeegsadaan macaamiishu, agabka lasoo waarido iyo agabyadii hore, qadiimka ah ama dib loo helay.

### *Sidee baan uga ilaalin karaa naftayda u baylihitaanka liidhka ee biyaha cabbitaanka?*

Ugu horreyn, waxa aad fahantaa in ay dhici karto inaad halis ugu jirto u baylihitaanka liidhka ee gurigaaga.

1. **Wax ka baro nidaamka biyahaaga cabbitaanka.** EPA waxa uu ku waajibinayaa dhammaan nidaamyada biyaha bulshada inay diyaariyaan oo ay soo gudbiyaan warbixin tayada biyaha ah oo sanadle ah. Warbixintan waxa laga heli karaa bogga

Tayada Biyaha ee websaytkeena waxana ku jira natiijooyinka muunadda ee laga helay shaybaadhka lagu sameeyey dhammaan nidaamka qaybinta ee Burlington. Nuqullo waraaq ah ayaa boosta lagu soo diri karaa marka la codsado.

2. **Biyahaaga shaybaadh.** Haddii aad ka walaacsan tahay in liidh ku jiri karto biyaha qasabadda ee gurigaaga, shaybaadh ayaa la heli karaa. Waaxda Caafimaadka Vermont waxa ay siisaa baadhis kiimikaad, shucaac, iyo jeermis biyaha cabbitaanka ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Dib u eeg shaybaadhada la heli karo, kharashaadka iyo tilmaamaha qaadista muunad habboon adiga oo booqanaya linkiga sare ama wacaya 1-800-660-9997.

Yaree baylitaankaaga adiga oo qaadaya tallaabooyinka soo socda:

1. **Falaash garee beebabkaaga kahor inta aanad ka cabbin.** Fur biyaha qabaw kahor inta aanad adeegsan muddo 5 daqiiqo ah markasta oo aanad adeegsan biyahaaga wax ka badan 6 saacadood. Tani waxa ay kasoo falaash gareysaa biyaha beebabkaaga kuwaas oo ay dhici karto inay taabanayeen waxyaabaha ka kooban liidhka muddo wakhti ah oo badan waxana ay xaqiijisaa in biyahaagu si toos ah uga soo baxaan beebka guud.
2. **Adeegso filtaro ama qalabka daaweynta.** Ka feker inaad rakibato filtar biyood. Waxa aad wax dheeraad ah oo ku saabsan agabka sida gaarka ah loogu talagalay inay yareeyaan liidhka ka baran kartaa adiga oo booqanaya Hay'ada Nadaafadda Qaranka.
3. **Cusboonaysii biyahaaga qasabadda.** Haddii aad ka shakido in biyahaaga qasabadda ee guduhu leeyihiin waxyaabo liidh leh, waxa aanu kugu la talinaynaa inaad qasabadaha qadiimka ah ku beddesho kuwo cusub oo buuxinaya shuruudaha kahortagga u baylihitaanka liidhka ee hadda. Waxa aad ka heli kartaa xirfadle biyo gelin oo liisan u haysta in uu ka shaqeeyo Vermont adiga oo booqanaya Waaxda Ammaanka Dadweynaha ee Vermont.

Fadlan ogsoonow in Magaalada Burlington ay hore u qaaday dhawr tallaabo oo ay kaga hortagayso u baylihitaanka liidhka ee biyaha cabbitaanka, iyada oo u baylihitaanka liidhku ay suuragalnimadeedu yar tahay.

## *Waa maxay jadwal wakhtiyeedka mashruucani?*

EPA waxa ay ku dhawaaqday Dib u Eegitaanka Xeerka 2021 kii balse keliya dhawaan ayaa ay soo saartay hagitaan ku socda gobolada oo sheegaya sida loo qabto liisaskooda-hubinta beebabka adeegga. Magaalada Burlington waxa yoolkeedu yahay inay hesho wareegga ugu horreeya ee jawaabaha macaamiisha ugu dambeyn Abril 2024 ka si aanu u sameyn karno la socod isla markaana u dhamaystiri karno liiska-hubinta ugu dambeyn wakhtiga kama dambeysta ah ee Oktoobar 2024 ka.

## *Khayraadka su'aalaha dheeraadka ah ee u baylihitaanka liidhka*

**Magaalada Burlington**

Barnaamijka Liidhka Burlington: www.burlingtonvt.gov/blp ama (802) 865-5323
Warbixinada Tayada Biyaha: www.burlingtonvt.gov/water/Water-Quality-Reports ama (802) 863-4501
Kooxda Daryeelka Macmiilka: water-resources@burlingtonvt.gov ama (802) 863-4501

**Gobolka Vermont**

Dhibaatooyinka Liidhka ee Guriga: www.healthvermont.gov/environment/home/lead-hazards-and-lead-poisoning
Shaybaadhka Biyaha Cabbitaanka: www.healthvermont.gov/lab/drinking-water-testing ama 1-800-660-9997
Sharciyada & Fulinta Liidhka: www.ago.vermont.gov/divisions/consumer-protection/consumer-resources/lead
Xirfadleyaal Biyo Gelin Liisan Haysta: www.firesafety.vermont.gov/licensing/plumbing

**Hay'adda Ilaalinta Deegaanka Maraykanka**

Sharciga & Dib u Eegista Liidhka iyo Koberka: www.epa.gov/dwreginfo/lead-and-copper-rule
Dhammaan Macluumaadka Liidhka: www.epa.gov/lead